



Ref: MOF/OM/0567/2024

July 18, 2024

Ku: - Dhamaan Wasaaradaha XFS	=Mugadisho=
Ku: - Agaasinka Miisaaniyadda ee W/Maaliyadda	=Mugadisho=
Ku: - Xisaabiyaha Guud	=Mugadisho=
Ku: - Hanti-dhowrka Guud	=Mugadisho=
Ku: - Bangiga Dhaxe ee Soomaaliya	=Mugadisho=
Ku: - Garyaqanka Guud	=Mugadisho=
Ku: - Xeer Illaaliyaha Guud	=Mugadisho=
Ku: - Guddiyada Madax Banaan	=Mugadisho=
Ku: - Dhamaan Ciidamada Qalabka sida	=Mugadisho=
Ku: - Maamulka Gobolka Benaadir	=Mugadisho=
Ku: - Maxkamadaha	=Mugadisho=
Ku: - Ururada Bulshadda	=Mugadisho=
Ku: - Hayadaha Gaarka	=Mugadisho=
Ku: - Rugta Ganacsiga	=Mugadisho=
Ku: - Ururada Bulshadda Rayidka	=Mugadisho=
Ku: - Aqoonyahanada	=Mugadisho=
Ku: - Ururada Dhalinyarada	=Mugadisho=
Ku: - Ururada Haweynka	=Mugadisho=
Og: - Xafiiska Raisulwasaaraha XFS	=Mugadisho=
Og: - Xafiiska Gudoonka Golaha Shacabka	=Mugadisho=
Og: - Xafiiska Gudoonka Aqalka Sare	=Mugadisho=
Og: - Xafiiska Maxadtooyadda DFS	=Mugadisho=

**Ujeeddo: Martiqaadka Aqoon-is-weydaarsiga Wadatashiga Miisaaniyadda DFS ee
Sannad Maaliyadeedka 2025-ka**

Wasaaradda Maaliyadda ayaa diyaarisay Istaraatijiyyad Miisaaniyadeed oo tilmaamaysa waxa u qorsheysan DFS in ay mudnaanta siiso 2025 iyo xilliga dhexe si looga shaqeeyo in la gaaro heerka kobaca dhaqaalahaa ee la saadaalinayo oo ah 3.9 boqolkiiba 2025 iyo 4.1 boqolkiiba xilliga dhexe. Iyada oo la raacayo hab-dhaqanka ugu wanaagsan ee caalamiga ah, Wasaaradda Maaliyaddu waxay idinku casuumtay aqoon-is-weydaarsi wada-tashi ah oo lagu raadinayo aragtiyada daneeyayaasha muhiimka ah ee ku aaddan istiraatijiyyadda miisaaniyadda iyo mudnaanta ay ku jirto ee 2025.

Aqoon isweydaarsigan ayaa sidoo kale ka tarjumi doona xaaladda dhaqaalahaa Soomaaliya iyo sidii loo heli lahaa xalal lagu dhaqaajinayo waxqabadka kobaca dhaqaalahaa mustaqbalka ee dalka. Sidoo kale, aqoon-is-weydaarsigu wuxuu ka raadin doonaa dhinacyada ay khusayso sidii ay DFS u taageeri lahayd ganacsiga gaarka loo leeyahay si ay u horumaraan oo ay u qaadato doorkeeda la filayo inay noqoto aalada kobaca dhaqaalahaa Soomaaliya. Soo jeedinta siyaasadeed ee la fulin karo ee laga soo saari doono aqoon-is-weydaarsigan waxa lagu dari doonaa Miisaaniyadda iyo qorshe-hawleedka Wasaaradaha iyo Hay'adaha kala duwan ee SM-2025.

Aqoon-isweydaarsigan ayaa waxaa ka qeyb galaya mas'uuliysiin ka tirsan dowladda Federaalka, hay'adaha gaarka ah, culumo-owdiinka, ururada bulshada rayidka, aqoonyahanno, dhalinyaro, ururada haweenka, deeq bixiyayaasha, iyo dadweyne kale. Waxaa la qaban doonaa inta lagu jiro 12-13 Agoosto 2024 waxayna yeelan doontaa laba madal. Madasha ugu horreysa oo kulmi doonta 12ka Agoosto 2024 laga bilaabo 09:00 aroornimo ilaa 04:00 galabnimo, waxaa ka qeyb galaya mas'uuliysiin ka tirsan dowladda DFS, ganacsiyada gaarka loo leeyahay, ururada bulshada rayidka ah, culumo-owdiinka, aqoonyahano, dhalinyaro iyo ururada haweenka.

Madasha labaad oo noqon doonta mid muuqaal ah, ayaa waxa isugu iman doona beesha caalamka iyo masuuliyiinta dawladda ee wasaaradaha u qaabilsan Maaliyadda, Qorshaynta iyo Maalgashiga, Madashan oo lala yeelanayo deeq-bixiyayaasha waxa ay dhici doontaa 13ka Agoosto 2024 laga bilaabo 3:00 galabnimo ilaa 05:00 fiidnimo.

Koox kasta oo lagu martiqado waxaa laga filayaa inay akhriyaan qabyo qoraalka istiraatijiyyadda miisaaniyada (oo laga heli karo mareegaha Wasaaradda Malaiyadda) oo ay diyaariyaan bayaan lagu soo bandhigi doono aqoon-is-weydaarsiga, kaasoo bixin doona faallo ku saabsan istaraatijiyyadda Miisaaniyadda Dowladda gaar ahaan meelaha mudnaanta leh ee ku jira istaraatijiyyadda kobcinta dhaqaalah, iyo marka loo baahdo, soo jeediyaan xeelado kale oo ay Dawladdu fuliso si loo kobciyo dhaqaalah, ballaarinta saldhigga canshuurta, yaraynta saboolnimada, iyo horumarinta bixinta adeegyada dadweynaha.

Bandhigaya kadib waxaa la guda geli doonaa dood guud, waxaana dooddha ka dib Wasaaradda Maaliyaddu ay soo bandhigi doontaa waxyaabaha lagu heshiinayo dood kasta iyo talooyinka waxqabad ee laga yaabo in lagu meel mariyo miisaaniyad sanadeedka 2025. Barnaamijka aqoon kororsiga ayaa ku lifaaqan arrintan. Ujeedada warqadani ayaa ah in la idinku casuumo Aqoon-is-weydaarsiga Wadatashiga Miisaaniyadda si aad door muhiim ah ugu yeelataan istiraatijiyyadda iyo mudnaanta Miisaaniyadda 2025-ta.

Ayaa Casuuman	Tirada la casuumay
Hayadaha Gaarka	10
Ururada Bulshada Rayidka	5
Rugta Ganacsiga	2
Hay'adaha Dawladda	2 Ruux Hay'add walba
Aqoonyahanada	3
Ururada Dhalinyaradda	3
Ururada Haweynka	3

Wada Shaqayn wacan

Bth 18/07/2024

Xil. Biixi Imaan Cige
Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda

